Oregon Health Plan iyo gelitaanka bukaanka ee duwaanada caafimaadka

Tusmada

Waxa aad xaq u leedahay inaad dalbato nuqulo duwaanadaada daryeelka caafimaadka ah. 2

Inaad hesho xogtaada caafimaad way sii fududaatay. 2

Waxa la samaynayo kahor inta aan lasoo dejin app-ka caafimaadka 2

Akhri siyaasada sirta app-ka 3

Waydii su'aalahan marka aad dooranayso app: 3

Khayraad dheeraad ah oo ku saabsan sirta iyo amaanka app-ka 4

Sida looga cawdo xogta caafimaadka la wadaagay 4

Miyaa ganacsigu u baahan yahay macluumaadkayga caafimaadka la ilaaliyay? 4

Miyaa ganacsigu yahay bixiye, xarun caafimaad, caymis caafimaad ama hay'ad caafimaad oo kale? 4

Miyaa ganacsigu yaay app, websayt ama ganacsi kale oo cid kale leedahay? 5

Wax su'aalo ah ma qabtaa? 5

Macluumaadka ku saabsan gelitaanka duwaanada xunbanaha qoyska ee kale: 5

Macluumaadka ku saabsan macluumaadka laga helo app-kaaga: 6

Taleefanka iyo khayraadka internatka 6

Waxa aad xaq u leedahay inaad dalbato nuqulo duwaanadaada daryeelka caafimaadka ah.

Waxa xaq kuu siinaya sharci la yidhaahdo Sharciga La Xisaabtanka iyo Dhaqdhaqaaqa Caymiska Caafimaadka (Health Insurance Portability and Accountability Act) 1996 ama HIPAA.

- Kani waxa uu kaa caawin karaa inaad gaadho go'aamo dhaama oo ku saabsan caafimaadkaaga oo aad samayso waxyaabo caafimaad ah oo dheeraad ah.
- Waxa aad dalban kartaa daryeelka caafimaad bixiye ama caymiska caafimaadka si aad u haysato wakhti kasta.

Waxa aad xaq u leedahay inaad xaqiijiso in macluumaadka ku jira duwaanadaadu ay sax yihiin oo aad ogaato cida aragtay. Waxa aad macluumaad dheeraad ah ka ogaan kartaa xuquuqdaada websaytka Waaxda Adeegyada Bilaa Aadanka iyo Caafimaadka Maraykanka.

Inaad hesho xogtaada caafimaad way sii fududaatay.

Laga bilaabo sanadkan, waxa aad sidoo kale ka heli kartaa duwaanada hay'ada daryeelkaaga la isku duba riday (CCO) ama caymiskaaga ilkaha adiga oo isticmaalaya app taleefankaaga ah, kombuyuutarkaaga ama aalad kale. Duwaanadan waxaa kamid noqon kara macluumaadka ku saabsan:

- Adeegyada daryeelka caafimaad iyo kharashkooda
- Xogta xarunta caafimaadka, sida natiijada shaybaadh
- Daawooyinka
- Bixiyaha aad la kulantay: Magaciisa, waxa uu ku takhasusay iyo macluumaadkiisa xidhiidhka

La xidhiidh CCO-gaaga ama caymiskaaga ilkaha si aad u ogaato nooca macluumaadka aad wadaagi karto, iyo goorta aad wadaagi karto.

Wixii xubno ah ee aan ku jirin CCO ama caymiska ilkaha, caymisyada Oregon Health Authority (OHA) waxay wadaagi doonaan macluumaadka badhtamaha-2023.

Waxa la samaynayo kahor inta aan lasoo dejin app-ka caafimaadka

Waxaa kuu muhiim ah inaad ilaaliso macluumaadkaaga caafimaadka. Macluumaadka caafimaadku aad ayay xasaasi u yihiin. Hadii aad ka fikirayso inaad isticmaasho app-ka si aad u eegto macluumaadkaaga caafimaad, ka taxadir. Dooro app ilaalin doona macluumaadkaaga sirta iyo amaanka ah. Si aad sidaa u samayso, qaado talaabooyinkan:

Akhri siyaasada sirta app-ka

Waxa aad eegtaa siyaasada qarsoodiga ah ee sida fudud loo akhrin karo oo si cad u sheegaya sida app-ku u isticmaali doona xogtaada Hadii app-ka aanu lahayn siyaasad sir, ha isticmaalin!

Waydii su'aalahan marka aad dooranayso app:

Hadii siyaasada sirta app-ku ayna si cad uja jawaabaynin su'aalahan, ama aanay niyadaadu ku qancin jawaabaha aad ka heshey, waxa aad isku daydaa inaad hesho app kale oo aad isticmaasho.

Xog noocee ah oo caafimaadka ah ayuu app-kani uruurin doonaa?

- Miyii app-kani ka uruurin doonaa xog aan caafimaad ahayn aaladayda, sida goobtayda?
- Sidee ayuu app-kani u kaydin doonaa xogtayda? Miyuu sidoo kale isticmaali doonaa macluumaadkayga shakhsi ahaaneed sida magacayga iyo taariikhdayda dhalashada? Miyay xogtaydu noqon doontaa sir?
- Sidee ayuu app-kani u adeegsan donaa xogtayda?
- Miyuu app-kani iibin doonaa xogtayda waxay doonto ha noqoto sababtu e, sida xayaysiis ama daraasad?
- Miyuu app-kani u bixin doonaa xogtayda waxay doonto ha noqoto sababtu e? Hadii ay sidaa tahay, yaa la siin doonaa xogtayda, oo waa maxay sababtu?
- Miyaan xadidi karaa sida app-kani uu u isticmaalo ee uu u bixiyo xogtayda? Hadii ay sidaa tahay, sidee?
- Sidee ayuu app-kani u ilaalin doonaa xogtayda oo uu u sugi doonaa amaankeeda?
- Hadii aan u isticmaalo app-kan xogtayda caafimaadka, miyay saamayn doontaa dad kale, sida xubnahayga qofka?
- Miyaan arki karaa oo aan sixi karaa xogta uu uruuriyay app-kani? Hadii ay sidaa tahay, sidee?
- Miyaan cabasho ka gudbin karaa app-ka? Hadii ay sidaa tahay, sidee? Miyaa cida samaysay app-ku ka jawaabtaa cabashooyinka?
- Hadii aan doonayo in app-ku uu joojiyo gelitaanka xogtayda, miyaan joojin karaa? Hadii ay sidaa tahay, sidee?
- Hadii aan jooji inuu galo, miyuu app-ku masixi doonaa xogtayda?
- Hadii aan doonayo in aan masaxo app-ka, sideen u xaqiijin karaa in xogtaydu sidoo kale masaxanto?
- Miyaa app-ku wargeliyaa isticmaalayaasha wixii isbedel ah ee ku yimid app-kan? Hadii ay sidaa tahay, miyee wargelinta ay kamid tahay isbedeleada saamayn kara sirta ama amaanka app-ka?

Khayraad dheeraad ah oo ku saabsan sirta iyo amaanka app-ka

Khayraadka Gudida Ganacsiga Federalka:

- Macluumaadka deeganka “Isticmaalka App-ka Caafimaadka”
- Tilmaamaha helitaanka app caafimaad oo amaan ah
- Sida loo ilaaliyo sirtaada app-ka
- Sida loo ilaaliyo macluumaadkaaga iyo xogtaada shakhsi ahaaneed

Khayraadka laga heley HealthIT.gov:

- Xaashida macluumaadka “ilaalinta amaanka macluumaadkaaga caafimaad"
- Waxa la samaynayo si loo ilaaliyo macluumaadkaaga caafimaadka
- Macluumaadka Gelida Bukaanka ee Shakhsi Ahaaneed: Hel, Gal, Isticmaal!

Sida looga cawdo xogta caafimaadka la wadaagay

Hadii xogtaada caafimaadka la wadaagay adiga oo aan ogolaan, waxa aad xaq u leedahay inaad cabato. Laakiin marka kowaad, waydii su'aalahan.

Miyaa ganacsigu u baahan yahay macluumaadkayga caafimaadka la ilaaliyay?

Websaytka Adeega Caafimaadka iyo Bilaa Aadanka Waaxda Maraykanka waxaa ku qoran cida ay ku waajib tahay iyo cida ayna ku waajib ahayn inay ilaaliyaan macluumaadkaaga caafimaadka.

- **Yaa u baahan?** Daryeelka caafimaad bixiyaha, caymiska caafimaadka iyo ganacsiyo kale oo taageera daawaynta daryeelka caafimaadka, lacagta bixiya oo shaqo siiya bixiyayayaasha iyo caymisyada.
- **Yayna waajib tahay?** Ganacsiyada aan maamulin daryeelka caafimaad, sida loo shaqeeye, bixiyaha caymiska nolosha, dugsiyada, hay'adaha bilayska, iyo hay'adaha dawlada gobolka/deegaanka ee aan bixin adeegyada daryeelka caafimaad ama caymiska. Badanaa app-ka dadka kale ee aan ku jirin HIPAA.

Miyaa ganacsigu yahay bixiye, xarun caafimaad, caymis caafimaad ama hay'ad caafimaad oo kale?

OHA iyo caymiska caafimaadku waxay labaduba leeyihiin Wargelin Nidaamka Sirta ah oo sharaxaysa sida ay u isticmaalayaan macluumaadkaaga caafimaad.

- Eeg Wargelinta Nidaamka Sirta OHA.
- Hel linkiyada wargelimaha caymiska ee ku jira boga Caymiska CCP ee OHA iyo boga Caymiska Ilkaha.

Hadii aanad ogolaanin macluumaadka la bixiyay, waxa aad ka xarayn kartaa cabasho Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee federalka:

- Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bilaa Aadanka Maraykanka (HHS) Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah (OCR) waxay baadhaan cabashoyinka dakda iyo hay'adaha raaca shuruucda HIPAA, sida bixiyayaasha iyo caymisyada caafimaadka. Waxa aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda bukaanka ee HIPAA websaytka OCR.
- Hadii aad in macluumaadka caafimaad si khalad ah loo bixiyay, waxa aad cabasho macluumaadka caafimaad ee la ilaaliyay aad ka xaraysaa OCR.

Miyaa ganacsigu yaay app, websayt ama ganacsi kale oo cid kale leedahay?

Badanaa app-ka dadka kale ee aan ku jirin HIPAA. Laakiin, sharciga FTC, iyo waxyaabo kale oo kale, waxay ka ilaaliyaan ficilada xun (sida, hadii app-ku bixiyo xogta shakhsi ahaaneed bilaa ogolaanshe, xataa hadii siyaasada sirta app-ku ay dhigayso in aan wadaagin).

Gudida Ganacsiga Federalka (FTC) waxay baadhaan xad gudubyada amaanka onleynka ah, khiyaanada, iyo nidaamyada ganacsi ee xunxun.

- FTC waxay sidoo kale bixisaa macluumaadka ku saabsan sirta amaanka app-ka mobileka macmiishiisa.
- Waxa aad xarayn kartaa cabasho sirta iyo amaanka onleynka ah si onleyn ahaan FTC.

Wax su'aalo ah ma qabtaa?

Macluumaadka ku saabsan gelitaanka duwaanada xunbanaha qoyska ee kale:

Hadii adiga iyo xubin kale oo qoyskaaga ah ay ku jrito CCO ama caymiska ilkaha (caymiska) oo isku mid ah, caymisku waxa uu bixin karaa macluumaadka caafimaad ee kaliya xubinta ama dhamaan xubnaha qoyska (sida, xisaab kooxeed).

- Waydii CCO-gaaga ama caymiskaaga ilkaha sida ay u wadaagi doonaan macluumaadka caafimaadka qoyska.
- Hadii aanad doonaynin in macluumaadkaaga caafimaadka lagu bixiyo koox ahaan, waa inaad waydiiso caymiskaaga sida aad wax ka bedel ugu samayn karto.

OHA iyo caymisku waxay labaduba leeyihiin Wargelin Nidaamka Sirta ah oo sharaxaysa sida ay u isticmaalayaan oo ay wadaagaan macluumaadkaaga caafimaad.

- Eeg Wargelinta Nidaamka Sirta OHA.
- Helwargelimaha caymiska iyo macluumaadka xidhiidhka ee ku jira boga Caymiska CCP ee OHA iyo boga Caymiska Ilkaha.

Macluumaadka ku saabsan macluumaadka laga helo app-kaaga:

Hadii aad doonayso in aad saxdo macluumaadka ku jira duwaankaaga caafimaadka oo aad ka aragtay app-kaaga, ama hadii aad qabto walaacyo in app-kaagu aanu weli isticmaalaynin helitaanka xogtaada:

- Wixii ah adeegyada CCO, la xidhiidh CCO.
- Wixii ah adeegyada caymiska ilkaha, la xidhiidh caymiska ilkaha.
- Wixii aan ahayn CCO ama caymiska ilkaha, la xidhiidh Adeega Macmiilka OHP.

Taleefanka iyo khayraadka internatka

Maxa aad u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta taleefanka ama internatka? Barnaamijka Oregon Lifeline waxa uu siiyaa dadka deegaanka ee u qalma qiimo dhimis bile ah oo taleefanka ama boroodhbaandhiga (internatka) kharashkiisa ah.

OHP.Oregon.gov

Waxa aad heli kartaa waraaqahan oo ku qoran luuqad kale, far waawayn, farta indhoolka ama qaab kale oo aad doonayso. Kala xidhiidh Oregon Health Plan (OHP) 1-800-699-9075. Waxa aad aqbali kartaa dhamaan gudbinta taleefanka ama waxa aad garaaci kartaa 711.

200-54851 (02/2023)